

## Bakteeriyyada u adkaysata qalajiyaha (antibiyootiga)

Waxaa lagaa helay bakteeriya u adkaysata antibiyootiga caadiga ah\_\_\_\_\_ . Tani ma saameyn doonto noloshaada ka baxsan isbitaalka. Looma baahna in aad u sheegto bakteeriyyada, tusaale ahaan, dhakhtarka ilkaha, masaajiistaha, timo jaraha iyo hiwaayadahaaga kala duwan ama markaad qof booqanayso.

U sheeg bakteeriyyada u adkaysata antibiyootiga marka isbitaalka lagu dhigo.

Waxyaabaha la tixgeliyo:

### Gacmo dhaqid

Ku dhaq gacmahaaga saabuun iyo biyo

- marka ay gacmuu wasakh yihiin
- ka hor intaadan karinin cuntada iyo markaad wax cunayso
- marka aad musqusha gasho kadib.

Haddii aad nabar qabtid, ku dhaq gacmahaaga saabuun iyo biyo oo ku qalaji tuwaal mar la isticmaalayo (tusaale ahaan istiraashada) kahor iyo ka dib markaad daawayso nabarka.

Faashada wasakhaysan si toos ah ugu rid bacda qashinka.

### Nadiifinta guriga

Waxaad isticmaali kartaa wasakhtiraha caadiga ah markaad guriga nadiifinayso.

### Maacuunka, dharka

Waxaad u sii wadi kartaa sida caadiga ah:

- maacuunka oo dhan meel ayaad ku wada dhaqi kartaa
- dharka oo dhan meel ayaad ku wada dhaqi kartaa heerkulka loogu tala galay.

### Booqashooyinka

Qof walba, iyada oo aan loo eegayn da'da (laga bilaabo ilmaha ilaa awoowaha), waa u xor in uu soo booqdo gurigaaga.

Waxaad macluumaaad dheeraad ah ku saabsan bakteeriyyada iska caabbinta badan ka heli kartaa ciwaanka THL ([www.thl.fi](http://www.thl.fi))

**Terveyskylä - infektiotalo/ Antbioottiresistenssi**

